

WAR-SAXAAFADEED

Maanta oo bisha December tahay 24, 2020 waxaa shirkayagan jaraaid kaga hadlayaa xaaladda doorasho ee dalka 2020-2021.

Waxaan rabaa inaan dul istaago oo wax ka iraahdo dawr qodob:

- 1. Wuxaan ugu baaqayaa Dowladda Federaalka, dawladaha xubnaha ka ah, daneeyayaasha Soomaaliya iyo Qaramadamidowbey, in ay u guntadaan waajibka ka saaran sidii doorasho daahfuran uga dhici lahayd dalka.**
- 2. Wuxaan kaloo ugu baaqayaa Dawladda Federaalka, dawlad-goboleedada xubnaha ka ah iyo musharrixiinta u tartamaya xilka madaxwaynenimo ee dalka ka dhacaysa in ay ka fogaadaan wax kasta oo Khalkhal galinaya nabadgalyada iyo xasilloonida dalka gaar ahaan magaalada caasimadda ee Muqdisho oo ay doorashadu ka dhacayso si xawli ahna uga soo kabanaysaa haarihii dagaalladii sokeeye ee dalka soomaray.**
- 3. Wuxaan cidkasta uga digayaa in hanashada xilka madaxwayne loo maro waddo khaldan sida kacdoon shacab iyo durbaan qabiil kaas oo dalka galinkara qalalaaso siyaasadeed iyo mid amni darro.**
- 4. Wuxaan soo dhaweynayaa Shirka labada hoggaamiye ee Punrland iyo Galmud, Mudane Siciid C/Ilaahi Dani iyo Mudane Axmed Cabdi Kaariye Qoor qoor. Wuxaan sidoo kale soo dhawaynaynaa cid kasta oo ka shaqaynaysa is fahamka iyo wada shaqaynta masuuliyiinta kala duwan ee dalka.**
- 5. Ugu danbayn, Wuxaan ugu baaqayaa shacabka Soomaaliyeed in ay ilaaliyaan dhankooda xasilloonida iyo amniga, kana qaybqaataan geeddi-socodka horumarka waddanka.**

Waad mahdsantihiiin.

Musharrax Madaxweyne: Bashiir Xaaji Cali (Jamaal)

